HSE National Immunisation Office (Xafiiska Talaallada Qaran ee HSE)

# Meningococcal C

## Waa maxay cudurka meningococcal?

Cudurka Meningococcal waa xanuun daran oo ay sababto bakteeriyada *Neisseria meningitidis*. Caabuqaan bakteeriyada ayaa keeni kara meningitis (dhaawac gaara xididada ku xeeran maskaxda) iyo septicaemia (sunta dhiiga).

Waxaa jira noocyo kaladuwan oo bakteeriyada *Neisseria meningitidis* oo sababa cudurka meningococcal. Kahor soo saarista talaalka meningitis C (MenC) sanadkii 2000, kooxaha B iyo C ayaa sababi jiray inta badan kiisaska cudurka meningococcal gudaha Ireland. Talaalka MenC ee ka hortaga bakteeriyada kooxda C ee meningococcal awgiis, tirada kiisaska cudurka meningococcal ee ka dhasha bakteeriyada nooca C ayaa si wayn hoos ugu dhacay. Inta badan kiisaska cudurka waxaa sababtay bakteeriyada kooxda C.

## Sidee ayuu cudurka meningococcal ugu dhacaa dadka?

Bakteeriyada meningococcal ayaa ku noolaan karta dhabarka danbe ee dhuunta ama sanka. Inta badan dadka, qaba bakteeriyadaan (sideyaal), ayaan dareemin wax xanuun ah laakiin way ku faafin karaan bakteeriyada dadka kale marka ay qufacaan, hindhisaan, ama shumiyaan. U dhawaanshaha dadka sida caabuqa ayaa mararka qaar kugu ridaysa caabuqa. Waa inaad saacado badan la joogto qofka caabuqa qaba si aad u qaado caabuqa maadaama bakteeriyadu aysan wax badan ku siin noolaan karin banaanka jirka.

Cudurka Meningococcal ayaa ku dhici kara da' kasta laakiin heerarka ugu badan ee cudurka meningococcal ayaa ku dhaca ilmaha ka yar hal sano jir, ayna ku xigaan ilmaha jira ilaa 5 sano. Kooxda xigta ee khatarta ugu wayn ugu jirta waa da'yarta da'doodu u dhexayso 15--19 sano. Gudaha Ireland khatarta caabuqa ayaa ugu badan xiliga jiilaalka iyo biloowga gu'ga.

## Waa maxay astaamaha cudurka meningococcal?

Biloowga cudurka meningococcal ayaa noqon kara mid degdeg ah. Astaamaha cudurka meningococcal waxaa kamid ah qandho, qoor xanuun, madax xanuun, xanuunka kala-goysyada, iyo faruurac. Haddii aad isleedahay in cunugaaga ama ilmahaagu qabo astaamaha cudurka meningococcal si degdeg ah caawimaad caafimaad uga raadso dhakhtarkaaga GP ga ama Waaxda Xaaladaha degdega ah ee carruurta ee kuugu dhow. Mararka qaar qaadista talaabo degdeg ah si aad u hesho caawimaad caafimaadka ayaa ka badbaadin karta qofka geeri.

Cudurka meningococcal waa cudur xun oo nafta khatar gelinaaya.

Dadka uu ku dhaco cudurka meningococcal:

- 1 kamid ah 20 kii qof ayaa u dhimata

- 1 kamid ah 10 kii qof oo kasoo bogsooda ayaa qabi doona naafooyin waawayn sida dhagoolnimo, waxyeelada maskaxda ama faraha gacmaha, faraha lugaha, gacmaha, cagaha, garbaha ama lugaha oo go'a.

In xili hore qofka laga helo cudurka ayaa keenaysa in isla markaba lagu daaweeyo antibayootig iyo fursad wayn oo ah in qofku si buuxda u bogsoodo. Baaritaanka xili hore ayaa muhiim ah marka haddii aad ka shakido in qof leeyahay astaamaha meningitis ama septicaemia si degdeg ah gurmad caafimaad ugu raadi.

Xog dheeri ah ayaa laga heli karaa http://www.meningitis.org/ireland

## Yay tahay Inuu qaato Talaalka meningococcal C (MenC)?

Meningococcal C ayaa looga hortagi karaa talaal.

Dhammaan ilmaha ayaa la siiyaa talaalka MenC markay jiraan 6 bilood ayagoo qaata kuurada dheeriga ah ee talaalka markay gaaraan 13 bilood.

Kuurada xoojinta ah ee talaalka MenC ayaa lagu baxshaa talaalka MenACWY oo la siiyo ilmaha sanadka 1[aad] ee heerka labaad ee dugsiga lagasoo bilaabo 2019 si difaac dheeri ah loo siiyo dhalinta soo koraysa iyo da'yarta qaangaarka ah.

## Talaalka meningococcal C (MenC) ma kahortagayaa dhammaan cudurka meningococcal?

Keliya caabuqa meningococcal C waxaa ka hortaga talaalka MenC. Noocyada kale ee caabuqa meningococcal ma daboolaayo talaalkaanu.

Talaalka meningococcal B ee ka hortaga caabuqa meningococcal B ayaa la bilaabay in la siiyo dhammaan ilmaha dhashay markay ahayd ama kadib 1 Oktoobar 2016 kaasoo qayb ka ah jadwalka talaalka carruurta ee Ireland.

Aad ayay muhiim u tahay in isha lagu hayo astaamaha cudurka meningococcal maadaama uusan talaalku daboolin dhammaan noocyada. Daryeelka caafimaad ee degdega ah waa in la raadsadaa haddii astaamuhu ay jiraan.

## Yay tahay Inuusan qaadan Talaalka meningococcal C (MenC)?

Waxaa jira dad dhawr ah oo ay tahay inaysan qaadan talaalka MenC. Cunugaagu waa inuusan qaadan talaalka haddii uu xasaasiyad xun (anaphylaxis) ka qaaday kuuro hore oo kamid ah talaalka ama qayb kamid ah talaalka.

## Waxa aad filanayso marka aad qaadato talaalka meningococcal C (MenC) kadib?

Kadib qaadashada talaalka, cunugaaga ayaa dareemi kara xanuun, gaduudasho ama barar ka fuula meesha cirbada looga dhuftay. Waxaa laga yaabaa inay cuncunto uuna qandho leeyahay.

Haddii sidaan dhacdo waxaad siin kartaa baristamool ama ibuprofen. Waa inaad soo kale siisaa biyo badan. Xaqiiji inauusan aad u diiranayn iyo inaan dharku xoqayn meesha cirbada looga muday.

Ilmaha ayaa caadiyan kasoo bogsooda ciladahaan fudud maalin ama labo gudahood

Ilmaha talaalka buuxa qaba:

- 1 kamid ah 2 qof ayaa noqda kuwo dabeecad xun
- 1 kamid ah 20 kii qof ayaa daremaaya xanuun, gaduudasho ama barar ka fuulaaya meesha cirbada looga dhuftay ama qandho yeelanaaya
- 1 kamid ah 100 qof ayuu ku dhici karaa calool xanuun ama matag

Ciladaha daran ayaa aad dhif u ah.

## Sidee ayuu talaalka Meningococcal C (MenC) u shaqeeyaa?

Talaalka MenC waxaa ku jira maadooyin lagasoo qaatay bakteeriyada meningococcal C. Talaalka ayaa shaqeeya asagoo u sahla nidaamka difaaca jirku inuu cudurka ka falceliyo bakteeriyada, asagoo uusan ilmuhu jiran.

## Waa sidee saamaynta talaalka MenC?

Talaalka MenC ayaa la xaqiijiyay inuu badqab leeyahay uuna aad waxtar u leeyahay. 90% kamid ah carruurta ayaa yeesha difaac ka dhan ah bakteeriyada meningitis C marka ay dhamaystaan jadwalkooda talaalka loo qoondeeyay. Ilaa markii talaalka la bilaabay dhammaadkii 2000, tirada kiisaska cudurka meningococcal, ee ka dhasha kooxda bagteeriyada C, ayaa aad hoos ugu dhacay. Tirada kiisaska lasoo sheegay ayaa hoos ugasoo dhacday 139 qof oo lasoo sheegay 2000 ilaa keliya 6 oo lasoo sheegay 2014; hoos u dhac dhan 96%. Waxaa jiray 10 qof oo laga helay cudurka meningococcal sanadkii 2021.

**Ogoow: Talaalka meningococcal C wuxuu keliya ka hortagaa kooxda C ee cudurka meningococcal kamana hortago noocyada kale ee cudurka, oo uu ugu muhiimsan yahay kooxda B ee meningococcal.**

## Xagee ayaan ka helayaa xog dheeraad ah?

La hadal xirfadle caafimaad oo aad ku kalsoon tahay oo booqo www.immunisation.ie